

Colorado Alternate (CoALT): Imtaxaanada Fanka Luuqada Ingiriiska iyo Xisaabta ee DLM

Qiimeynta waxay siisaa warbixin qiimo leh ardayda, waaladiinta iyo macalimiinta oo kusaabsan in ardaydu ay gaareen heerka fasalka laga rabo iyo heerarka udagsan maadada ayna kusocdaan wadadii qalin jabinta oo udiyaarsan qarniga 21 aad. Natiijooyinka qiimaynta waxaa loogu talagalay inay hal cadayn unoqdaan hormarka aqooneed ee cunugaaga.



MAXAY TAHAY QIIMAYNTAAN?

CoAlt: Imtaxaanada Fanka Luuqada Ingiriiska iyo Xisaabta ee DLM waa imaxaano heer caadiya llagu baxsho wuxuuna cabiraa hormarka ardaydu kasameeyaan Natiijooyinka Cadaynta Dheeraadka ah ee Heerarka Waxbarashada Colorado. Kani waa imtaxaan gobalka qasab ka ah lagana qaado ardayda qaba naafada dhanka fahanka oo wayn kuwaasoo aan awoodin inay kaqaybgalaan imtaxaanka PARCC, xataa marka caawimaad lasiiyo. CoAlt: Imtaxaanada Fanka Luuqada Ingiriiska iyo Xisaabta ee DLM waxaa laga qaadaa ardayda fasalada 3-11.



XAGEE AYAA CUNUGAYGA IMTAXAANKA LOOGA QAADAYAA?

Cunugaaga waxaa imtaxaan laga qaadayaa bisha Abriil. Canugaada waxaa la imtixaamayaa kaliya maalmaha qaarkood sida ku saleysan fasalka iyo maadada, ma ahan xiliga lagu gudo jiro qeybta oo dhan. Fadlan laxariir macalinka cunugaaga si aad uhesho xiliyada gaarka ah ee jadwalka imtaxaanka.



WAA MAXAY BUUNDOOYINKA CUNUGAYGU HELI DOONO?

Cunugaaga waxaa lasiinayaa buundo cabiran iyo heer muujinaaya dadaalkiisa aqooneed.

CoAlt: Ururka DLM ayaa dhameeyay Jadwalka Caadiga ah xiligii dayrta ee 2018. **CoAlt:** Macluumaadka Buundooyinka Ardayga Imtaxaanada Fanka Luuqada Ingiriiska iyo Xisaabta ee DLM waxaa loo gudbinayaa Waaxda Waxbarashada ee Colorado xiliga dayrta ee sanadka 2019.



SIDEE AYAA BUUNDOOYINKAAN LOO ADEEGSANAYAA?

Ujeedada rasmiga ah e barnaamijka imtaxaanku waa in lagoon'aansho heerka ardayda Colorado ee qaba naafada wayn ee dhanka fahanka ah kubuuxin karaan Natiijooyinka Cadaynta Dheeraadka ah ee Heerarka Waxbarashada Colorado ee Imtaxaanada maadooyinka Fanka Luuqada Ingiriiska iyo Xisaabta marka lagaaro dhamaadka heerka fasalka lagu imtaxaanaayo. Natiijooyinka CoAlt waxaa loogu talagalay in lagu baxsho hal cabir oo hormarka waxbarashada ardayga ah oo laxariirta Natiijooyinka Cadaynta Dheeraadka ah.



WARBIXIN DHEERAAD AH

Waxaan kugu dhiirgalinaynaa inaad kaqaybgasho waxbarashada cunugaaga. Fadlan haka daahin inaad laxariirto macalinka ardaygaaga si uu kuugu sheego qaababka aad kucaawin karto cunugaaga markuu guriga joogo iyo helitaanka caawimaado dhanka imtaxaanka ah.

Hadaad su'aalo iyo walaacyo kaqabto imtaxaanada, fadlan laxariir dugsiga cunugaaga si toos ah ama wac Adeegyada Deegnaaka Qoyska oo nambarkoodu yahay (720) 423-3054.